



**MAALIN GROUP LTD
HEADQUATER**

ADDRESS: A-3-9, AVENUE 8, JALAN 8/1,
SECTION 8,46050

PETALING JAYA SELANGOR, MALAYSIA

Tel:+60 1151 339 294

Email: maamulka@maalin-group.com

management@maalin-group.com

www.maalin-group.com

Ref: NOV00327

08 NOV 2021

بِسْمِ اللَّهِ الرَّحْمَنِ الرَّحِيمِ

WAR MURTIYEED

Shirkadda Maalin Group waxay la wadaageysaa macaamiisheeda sharafta leh, gaar ahaan inti ka qeyb-qaadatay wejiyaddi koowaad iyo labaad ee u gudbay wejiga sadaxaad. Walaalayaal, Sida aan ku balannay wuxuu qorshuhu ahaa in wejiga sadaxaad loo gudbo bisha October, laakin nasiib-darro waxaa soo kordhay caqabado cusub oo ka yimid qaar kamid ah wakiiladdi hore oo wali aan soo gudbin liiska dadka haray ee macaamiisha u ahayd.

Waxaa xusid mudan in shariikaddu ay ka koobneyd wakiilo isku tagay oo soo aruuriyen macaamiil gaaraya Afar kun (4000) kuwaas oo faa'iido balaaran ka helijiray shariikadda. Hase yeeshee marki uu dhibku dhacay qaarkood iska dhigay dhibbanayaal, walina aan ogoleyn in la xisaabtamo. Shirkadda Maalin Group oo garowsan dhibka dhacay islamarkaana dooneysa in ay qaadato mas'uuliyadda qeybta ay kuleedahay ayaa guddiyo ay saartay waxay soo ogaadeen in qaladku ay ka yimid wakiilada qaar oo dhexda wax ka bixiyay, Kuwaas oo ilaa hadda diiddan in ay qaan baxaan oo ay dadka xoolahooda u celiyaan ama ay cadeeyaan in shirkadda lagu leeyahay.

Ilaah mahadiis dad gaaraya 1220 qof ayaa ilaa iyo hadda is diiwaan-geliyay oo buuxiyay shuruudihi laga rabay taas oo u dhiganta in 30.5% macaamiisha la sheegay in ay wax ka maqanyihiin.

HOLDING COMPANY

British Virgin Island (UK)



**MAALIN GROUP LTD
HEADQUATER**

ADDRESS: A-3-9, AVENUE 8, JALAN 8/1,
SECTION 8,46050

PETALING JAYA SELANGOR, MALAYSIA
Tel:+60 1151 339 294

Email: maamulka@maalin-group.com
management@maalin-group.com

www:maalin-group.com

Shirkadu waxay horay u balan qaaday in 1-da August 2021 ay macamishii ka qeyb qaatay diiwaan galinta siin-doonto (Member Code) ama aqoonsi gaar ah, taas oo ay shirkada Maalin Group qaybteda diwaan galinta ee Maalin General service ku guleysatay in ay helaan macaamiisha inta isa soo diwaan galisay oo ansixinta (Aprovel-ka) heshay.

Shirkada qaybteda diwaan galinta ee Maalin General service (Maalings) waxay Sido kaloo Macaamiisheeda inta sida saxda ah u soo dhammeystirtay Form-kii laga rabay ugu bishaareynaysaa inay heli doonaan Shahaado Caddeyn ah, sidoo kale 31 Dec 2021 waxay Shirkaddu idinla wadaagi doontaa habka lacag bixinta (Payment Method).

FIIRO GAAR AH:

Waxaa ilaa hada soo garay shirkada Form-ka, dad aad u yar oo garaya 50 qof u dhigan 4%.

waxey marka kale shirkad si xushmad leh u codsanaysaa in ay from-ka macaamiisha soo saxiixaan si deg deg ahna, ugu soo diraan Email-da hoos ku xusan, ka hor 31-ka Dec 2021

Info@maalings.com

Maalingeneralltd@gmail.com

Maalings1@gmail.com

WABILAAHI TOWFIIQ

HUSSEIN HASSAN
PUBLIC RELATION &
COMMUNICATION MANAGER



HOLDING COMPANY

British Virgin Island (UK)